

# Qaaxada – Sidee lo daaweeeyaa

Halkan Ka Akhri.  
Talooyinkan  
daaweyntaadu way  
guluaysanaysaa.

Waad bodgsan marka  
aad daawada maalin  
kasta waqitgeeda  
ku qaadato.

Keligaa ma  
tihid, waa lagula  
socdaa, muddada  
dawaayntani  
kuu socoto.



Adiga waxa lagaa helay xanuunka qaaxada. Wawa sababa Jeermiga (Mykobakterium Tuberculosis). Waa cudur faafa oo lagu kala qaado hawada la neefsanaayoo una kala gudubta qofka qaba iyo kan aan qabin.

Daawada oo la qaato ayaa baabiin karta jeermiga qaaxada. Waanad ka bogsan doontaa qaaxada, marka aad daawada u qaadato sidaa dhakhtarku kugula taliyay illaa daawadu kuu dhammaanayo.

### **Qoraalkan oo ah talobixin wixa aana kaga hadlaynaa in daawooyinka oo qudh lagu baanan karo cudurka qaaxada.**

- Waxa dhici karta in aad qaaddo cudurka qaaxada oo u baahan daawooyinu gaarka ah. Xaaladdas waxa aad u baahan kartaa dhammaan daawooyinka qaaxada. Cudurka waxa lagu daaweyeyaa 4–5 sano oo la isku daro , daawytanta la wado muddo ah 2–3 bilood. Muddada daawayntu waa illaa 6 bilood.
- Qaaxada adgaysiga leh ee aanay daawadu karin waa cudur qofku qaadi karo wixa kale oo sababi kara daawada oo aan sidii lagugula taliyay aan loo qaadan ama la kala googooyay. Qaaxada daawadu aany karin wax lagu daaweyeyaa 4 ilaa 7 daawo oo la wada qaato. Mudada daaweyantu waxa ay qaadanaysaa ilaa 2 sano.


### **Daawaynto sideebay u soconaysaa**

Daawada waxa lagu bilaabaya isbitaalka gudhiisa. Haddii xanuunka qaaxada ee aad qabtaa yahay nooca la kala qaadayo, waxa marka hor lagugu daawaynayaa qol gaara. Isla waqitgaas waxa la hubinayaa in daawooyinka lagu siinyaa ay cudurka daawayn karaan tiiyoo lagu hubinaayo baadhista shaybaadhka. Marka la ogaado in xanuunka aanad u gudbinayin dadka kale iyo in xaaladaada caafimaad flicantahay waxa daawaynta lagu wadi karaa guriga.

Daawaynta waxa inta badan lagu bilaabaa 4–5 daawo. Daawooyinka wax loo baahanyahay inay dhawr daawo yihiin si ay midba mida kale uu buuxiso awoodeeda. Jeermiga qayb ka mida ayaa aayar aayar iyo si naadira u badata. Daawada waa in loo wadaa si joogta ah muddo dheer, si uu jeermiga oo dhami ku dhinto oo aad uga bogsato xanuunka.

Daawadu waxay ugu waxatar badantahay, marka la qaato caloosha oo madhan, sida badan ilaa 2 sacadood quraacda ka dib. Qaadaashada daawada ka dib waxa aad wax cuni kartaa nusa-saac ka dib.

Daawooyinka la qaadanayo tiradooda waxa la yaraynayaa muddo ah 2–3 bilood marka daawadu socoto ka dhib. Daawayntu in ay hirgashay iyo watarkeeda waxa lagula soconayaa isbitaalka, si qorshaysan oo muddaysan. Dhiigga waxa la qaadaa 1–2 bilood gudahood. Sawirka feedhaha waxa la qaadaa dhawr jeer muddada daawadu socoto iyo marka daawadu dhammaato.



### **Keligaa ma tihid – Waa lagu tageerayaa waqtiga daawadu socoto**

Dhammaan Bukaanada qaaxadu waxa ay xaq u leeyihiin in la taageero iyo in la lala socdo waqtiga daawadu socoto. Dhakhtarka iyo kalkaalisaada aaya mas'uul ku ah daawayntaada, caafimaadkaaga iyo in aad bogsato. Isbitaalka hawladeenka sooshiyalka iyo kalaaliyaha xaga dhimirku waxa ay kuugu diyaar yihiin la tashi.

Qaadashada daawada waxa aad mar mar dareemi kartaa in ay kugu adkaato ama aad ilowdo, ama daawadu kuu keento dhibaato. Sidaas awgeed ayay kalkaalisaadu ay la socota xaaladaada oo ay goob joog u tahay, mark aad qaadanaysid daawada, sidoo kale isbitaalka iyo marka aad ka soo baxdo isbitaalkaba. Kalkaalisaada aaya kula heshiinaysa sida daawadu kuugu socon doonto guriga marka aad tagto ka dhib. Inta badan waxa aad la kulmi doontaa kalkaalisaada 5–7 goor todobaadki.

Xaaladaha kala duwan ee nolasha awgeed daawada waxa lagu qaadan karaa goopta bukaan socodka, ama goopta daryeelka caafimaadka shaqaalaha. Wxa kale oo daawada guriga kuku siin kara, kalkaaliyaha caafimadka guriga. Sidaas aayaah sida ugu fiican ee lagu hubin karo qaadashada daawada. Isla markaaasana waxa ay ka hortag u noqonaysaa in aana jeermigu daawada adkaysi u yeelan.



**Haddii aad qufacdid afkaaga iyo sinkaaga masar ku qabo ama ku qufac oo u dhig jintaada.**

### **Daawada asaasiga ah ee Qaaxada**

Qaaxada daawooyinka u nugul waxa lagu daaweyya daawooyinka asaasiga ah oo ah Isoniazide (magaceega shirkada Tublysin), rifambisiin (Rimapen ama Eremfat), byrasiiiniamid (Tisamid), etambutol (Oributol) ja streptomysiin (Streptomycin ama Streptofatol). Xaaladaha qaar waxa la istimaali karaa Levoflokasasiinia (Tavanic).

### **Adigu shaqsi ahaan u sheeg Dhakhtarka macluumaadka kuu muhiimka ah**

Si loo fuliyo daawaynta iyo in lala socdo si loo qorhseeyay , waxa muhiim u ah dhakhtarku in uu ogaado xogtaada arrimahana soo socda:

- Dhammaan daawooyinka aad qaadatid, daawooyin dhaqan haddii aad qaadato iyo wixii aad u isticmaasho nafaqo ahaan ee aad isticmaashid.
- Dhammaan wixii cuduro ah ee lagugu caddeeyay.
- Haddii ay jiraan dawooyin aad Alerjig u leeday oo la caddeeyay.
- Hore haddii ay jireen xanuuno beerka ah amla kelyaha oo shaqdoodu xuntay.
- Haddii hore laguugu caddeeyay arraga ama maqalka oo hooseeya sida midabada oo aanad saani u kala sooci karin iyo maqalka oo hooseeya ama dhawaqa oo isku darsama.
- Haddii aad Uur leeday ama aad ilmo nuujinayo.

**+** Badhitaanka xanuunka qaaxada, daawaynta aad ka helayso isbitaalka iyo kulamada lagu soconayaa xanuunkaaga wax ay kuu yihiin lacag la'aan.

**+** Kalkaalisaada aaya daawada ku siinaysa waxa aanay kuugu heegan tahay inay ku caawiso. Wxa aad u sheegikartaa xaaladaadu sid ay tahay iyo dhammaan waxii aad u bahan tahay in wax lagaala qabto.

**+** Hirgelinta daawaynta waxa lagula soconayaa isbitaalka tiifyo dhakhtarka aad la kulmayso.

**+** Dhakhtarka aaya go'aaminaaya haddii wax laga bedelaayo daawooyinka iyo marka ay dhammaanayso daawayntu.

**+** U sheeg Kalaalisada iyo dhakhtarka waxa kasta oo calaamado xanuunka oo aad dareento ama wixii dhiba ee aad daawada ka dareento.

## Qaadashada daawooyinka waxa ka iman kara Dhibaato daawdu keento

Qof kasta oo oo bani aadama waxa uu daawada u xamili karaa si gaar u ah. Todobaadka ug horeeya marka daawada la bilaabo waxa inta badan iman kara dhibaato la xidhiidha daawada, laakiin waa ay yaraataa marka daawadu ay siis ocoto. Waxa calaamadaha dibaatada lagu yarayn karaa farsamooyin kala duwan iyo daawayn.

Dhibaatada ugu badan ee daawdu leedahay waa daal, nafsada cuntada oo hoos u dhacda iyo lalabo. Cuntada nooceeda oo la bedelo waxa uu raad ku yeelan karaa nafsada cuntada. Lalabada waxa aad u baahan kartaa daawo ka hortaga.

Dheecaanada jidhka sido kale kaadida, candhuufta, manida, dheecaanka saxaaxa waxa yeelanayaan midab cas oo ah midabka cas ee daawada rifamibisiin. Taasi waxa dhiba ma laha.

Haddii jidhku uu yeesho dhiigroor ama uu jidhku ku cuncuno, waxa kaa caawinayaan in aad mariso kareemka jidhka, ama saabuun engejisa ama waxa u baahan kartaa daawada loo yaqaan kortison oo kereem ah ama daawada allerjiga.

Dhibaatooyinka kale ee daawadu yeelan karto waa xubno xanuu, laabatooyinka oo barara, calooxanuu amma shuban. Xubno xanunka waxa caawin kara dhakhtarka oo kuu qora daawada xanuu biyaha. Caloosha iyo midhicirada xanuunkooda waxa caawin kara cuntada oo la bedalo ama waxayaabaha dhima bakteriyada caloosha. Dhibaatooyinkan daawadu keeni kartaa maaha kuwo khataro.

Daawada Isoniasid waxa ka iman kara dareen ah in gacmaha iyo luguhu danqanayaan ama dareenkuna yaraanayo. Taas waxa lagaga hortegi karaa in la qaato daawada Fiiitamin B6. Fiiitamin D iyaduna waa loo baahan yahay, dareenka yaraaday ayay hagaajinayaan.

Daawooyinka qaaxadu waxa ay hoos u dhigaan ama waxayeeleeyaan shaqada beerka, sababtaas awadeed waxa habboon in la iska dhawro cabida khamriga iyo dhaawooyinka wax u dhimi kara beerka ( sida parasetamoolka – daawada xanuu biyaha) iyo daawaynta dhirta.

## Dhibaatooyink daawooyinka ee culus

**Haddii aad argtid dhibaatooyinka daawada ee culus deg deg ula xidhiidh kalkalaisada, dhakhtarka ku daawaynaaya ama shaqaalaha heeganka ah (eeg maclumaadka ee bogga dambe ku yaala). Xaaladdaas waa in daawada la joojiyaa oo xaaladdana si degdeg ah loo qiimeeyaa.**

Calaamdaahaasi waxa ka mid ah:

- Calool xanuun
- Indhaha ama jidhka oo huruud noqda
- Mataga iyo lalabo
- Nabaro balaadhan oo jidhka ama afka ka soo baxa
- Aragtida oo yaraata ama midabada kala soocidooda oo yaraata.
- Maqlaka oo yaraada ama codka oo isu darsama.
- Kaadida oo yaraata
- Nolosha oo dhibaato noqota
- Cidhbaha oo xanuun aad ahi kaa qabto
- Garaaca wadnaha oo is bedela ama adoo dareemaya inaad xanuunsanayso
- Xanuun suuxdina oo ku qabta

## Sideed adigu ugu gulaysan lahayd in aad bogsato

### Waqtiga lagugu dawaynaayo isbitaalka gudihiisa, daawayntu waxa ay ka dhacysaa qolka gaarka ah ee lagu jiifin doono

Kula xidhiidh ethelkaaga iyo saaxibadaa matalan adeega isgaadhsinta bulshada (social media).

Waxa la ogol yahay in lagu soo siyaarto, laakiin dad tiro badan lama ogola. Carruurta yaryar lama ogola, sidaas aaya lagaga badbaadin karaa carruurta faafidda cudurka.

U soo qaado alaabta wiixi aad u baahan tahay qolka gaarka ah. Halkas ku qaado nolol maalmeedkaaga.

Buuggaag, iyo jaraaid akhriso, filimo daawo, la soco internetka, adigoo kolba bedbedlanaaya.

Jimicsi jidhka ah samee, debadda soo socsoco haddii ay kuu suurtogelayso.

Codso oo cun cuntada aad kolba jecelaato iyo cabitaankaba.

### Daawaynta

Daawooyinka u qaado dhammaantood sida ay dhaqaatiirtu kugula talisay. Haka tegin qaybna xataa haddii aad dareetnid in aad fiicnaatay, waxa dhici karta in dareenkii xanunku aanu kuba hayn.

Haddii aad ka shakidid ama aad dreentid in ay jirto dhibaato daawadu kuu gaysatay u sheeg kalkalisada ama dhakhtarkaaga si ay u hubiyaan in aan daawooyinku iska hor iman oo aanay dhibaato keenin.

Haddii ay jiraan dawooyin aad adigu iskaa isugu daawaynaysay ama xanuu biyiye u sheeg kalkalisada ama dhakhtarkaaga si ay u hubiyaan in aan daawooyinku iska hor iman oo aanay dhibaato keenin. Safar dheer in aad qorshysataa ma habboona waqtiga daawooyinku kuu socodaan. Safarada gaagaaban kala tasho kalkalisada in aanad safarka bilaabin horteed. Waxa la sii qorshayn sida daawadu u soconayso si aanay kaaga kala guu'.

### Cuntada iyo nafaqada

Waxa muhiima in aad si fiican cuntada u cuntid, si jidhkaagu u helo nafaqada aad u baahan tahay kaana caawinaya xanuunkaaga.

Haddii aad xoog u caatoowday, waxa muhiima in aad cuntada aad cunayso koridhiso, khaasatan wixii duxle iyo brotiinka. Noocyada cuntada ee habbooni waa khudrada, kudrada macaan, kalluunka, hilibka, digirta, lawska, baradhada, boorashka, bariiska iyo ukunta.

Haddii aad cuntada ku lalabooto waxa fiican in aad wax cunto marar badan iyo kolba cunto yar iyo cuwaaf. Cuntada oo si degan loo cuno iyo tiyyo si fiican loo calaliyo iyo tiyyo loo yara nasto cuntada dabadeed iyana waa caawin kartaa in aanad ku lalaboon.

Haddii aad cunto xuntahay, wax cun markii aad nafsad u haysid. Karso amd diirso cuntada aad kaydsato sidoo kale khudradda caadiga ah iyo qadhaabka midhaha ah iyo wixii khudrad cagaar ah ama kuu dhandhami karta cun. Cunto ku soo jiidata oo marka la eego qurux badani waxa ay hagaajinaysaa nafsada, sidoo kale socodka debeda oo si qorshyan loo lugeeyo bannaanka.

U cab si fiican (qiyas ahaan 2 litir oo biyo ah am casiira maalintii). Cabidda qaado waqtiga u dhxeeyaa cuntada si aanda caloosh u buuxin waqtiga cuntada.

Iska jooji cabbitaanka khamriga muddada daawadu kuu socoto, waxa ku xumaynayaan shaqada beerka. Daawada qaaxadu waxa jidhka ka saara beerka, markaas waa in la ilaaliyaa in beerka shqadiisa la dhabin, beerka shaqadiisu xumaato daawaduna waxa ay noqonaysaa in la hakiyo.

## **Jimicsiga, waxbarashada iyo shaqada**

Daalku waxu hoos u dhigaa in uu caafimaadku hirgal. Bilowga daawaynta wixa fiican in aad nasato.

Si joogta u samee jimicis caawin kara jidhka si uu u caafimaado. Maalin kasta samee socod degan, waa suurtagal bilowgaba, marka aad dareento ina aad dhaqdhaqaqa debbedda Karyso.

Waxa aad kordhin kartaa jimicsigs tartiib-tratiib kolba inta aad kartid.

Dugsiga iyo shaqdaba waad ku noqon kartaa isla markiiba, marka aad karto in cuntada aad qaadan karto iyo in aad socodka karayso. Waxa ay wanaajinaysaa maskaxadaa iyo rajadaada. Haddii ay shaqadu kugu adag tahay dhaqtarkaaga ayaa qiiimaynaaya in aad karayso.

## **Noloshaada Mujtamacu**

Cudurka qaaxada iyo daawadiisuba waxa ay kuu keeni karaan daal jidhka ah, Dareemo badan oo kala duwan iyo moraalka oo hoos u dhaca.

Si toosa oo looga wada hadlo iyo maclumaadka qaaxada oo lagala sheekaysoto qaraabada iyo saaxiibada ayaa taageero kuu noqonaysa waqtiga ay daawadu kuu socoto.

Dadaal yar iyo ficioo yar yar oo aad qabato aya keeni karta dareen fiican oo korna u qaadi karta rajadaada.

Qof walba waxa uu leeyay habkiisa iyo caadadiisa uu ku kobcinaayo caafimaadkiisa. Tixgeli oo fahan arrimahan iyo xidhiidhka dadka aad ka heli kartid dareen fiican iyo awood.

## **Galmada**

Galmada waad samyn kartaa waqtiga daawadu socoto sida caadiga ah. Qaaxadu kuma fido isku gal moodka ama is dhunkashada.

Waxa dhici karta in bilowga daawaynta in aad u daasho oo ay dhicikarto in aanad galmada xiisayn. Xaaladdaas wixa fiican in aad u sheegto xaskaaga ama ninkaaga.

Daawooyina qaaxadu shahwada raga wax dhibaato ah uma gaystaan. Daawada Rifambisiin waxa ay dacifisaa daawooyinka ka hortaga dhalmada dumarka, waqtiga dhalmada waa in loo bedelaa hab kale oo lagaga hortegi karo dhalmada oo aan ahayn habka kiniinka ah. Taas kala hadal dhakhtarkaaga.

Hooy, ma  
tagi karna  
sinimaha?



## **Uurka**

Waxa fiican haddii la qorshaynaayo uur in uu dhaco daawynta qaaxada ka dib. Adoo caafimaad qaba ayaad carruutra si fiican u daryeeli kartaa.

Haddii aad uur leedahay marka lagugu caddeeyo xanuunka qaaxada, marka la qorsheeyo daaweynta waa in lala socodaa dhaqtarka dumarka si uu ula socdo xaaladaada caafimaad. Ku dadaal in aad si fiican wax u cuntid iyo cunto u wanaagsan caafimaadka.

Haddii daawaynta qaaxadu si fiican u hirgasho, ilmuuhua waxa dareyeeli karta hooyada, hooyaduna si caadi ah ayay u nuujin kartaa ilmaha, dhalmada ka dib.

Haddii hooyadu xanuunka ay qabtaa yahay mid la kala qaadi karo waxa ilmaha loo bilaabi doonaa daawada ka hortegi karta qaaxada.

## **Awoodaha kaydka ah ee kordhiya caafimaadka**



Cuntada caafimaadka u fiican




Saxiib



Jimicsiga



Ehelka



Wixii kale ee ku  
caawinkara



Qof ku taageera  
waqtiga  
Daawadu socoto



Macluumaadka shaqasiga ah  
Isbitalka marka lagu jiro:

Haddii daawadu ka socoto Bukaan socodka:



Macluumaad dheerada



**TB** tuberkuloosi.fi

mielenterveystalo.fi • syohyva.fi



**Hengitysliitto**